Codsigaaga magangelyada ah

Macluumaadka dacwada xuduudaha

Maxaa laguu siinayaa warbixintaan?
Waxaad Nederland gudaha u soo gashay adigaa oo adeegsaday garoon diyaaradaha ama dekked badda. Waxaad rabtaa hadda in halkaan aad megengelyo weydiisato. Megengelyo waxaa loola jeedaa: Badbaadin uu wadan kale uu badbaadinayo dadka wadankoodu aaminka ahayn iyo aanay wadankooda ka heli karin badbaadin.

Haddii aad codsi megengelyo ah gudbiso , waxaad dowlada Nederland si rasmi ah u weydiisaneysaa in lagu siiyo sharci degenaansho. Sharcigaas waa mid aad u baahantahay si wadankan Nederland aad ugu noolaan kari lahayd. Codsigaaga magangelyada ah ayuu ka bilaabmayaa dacwada qaxootinmada; waa nidaam sharci ah oo ay dowlada Nederland ku qimeyneyso in adiga sharci lagu siinayo iyo in kale. Codsigaaga magangelyada waxaa looga howlgalayaa qaabka dacwadaha xuduudaha. Dacwada xuduudka waxay qaadataa ugu badnaan 28 maalomood.

Warbixintaan waxaad ka akhrisan kartaa waxa dhacaya inta lagu jiro dacwadaha xuduudka. Waxaad kaloo ka akhrisan kartaa waxa ay tahay in aad samayneyso (waajibkaaga) iyo waxa aad ka filan kartid dowlada Nederland (xuquuqdaada).

Talaabada 1: isdhiibid iyo diiwaangelin

Waxaad isu dhiibtey ciidanka xuduudaha Nederland. Inta badan kuwaasi waa ciidanka Koninklijke Marechaussee.

Dadka u shaqeya Koninklijke Marechaussee ayaa xaqiijinaaya aqoonisagaada. Iyaga waxay diiwaan gelinayaan macluumaadkaaga shaqsiga ah, sida magacaaga, taariikhda dhalashadaada iyo jinsiyadaada. Waxay baarayaan dharkaaga iyo boorsooyinkaaga waxay kaa qaadayaan sawir iyo sawirka faraha. Waxaa lagu siiyay qoraal warbixin oo ay ku sharraxan tahay sababta lagaaga qaaday sawirka faraha. Codsiga magengelyo waad saxiixeysaa.

Waxaa kaloo lagu weydiin karaa su'aalo ku saabsan wadada safarkaaga, ama in aad horey megengelyo halkaan uga codsatey ama meel ka mid ah Europe iyo in ay qoyskaaga dad ka mid ah ay halkaan joogaan ama meel kaloo Europe ah.

VluchtelingenWerk Nederland

VluchtelingenWerk Nederland (Ururka Gargaarka Qoxootiga Nederland) waa urur madax banaan ee u taagan xuquuqda aadanaha waxaa loo asaasey in uu danaha qoxootiga ilaaliyo. VluchtelingenWerk (Ururka qaabilsan gargaarka qoxootiga) wuxuu kuu siinayaa warbixin iyo sharaxaad ku saabsan dacwada qoxootinimada, si shaqsi ah kuugu wargelinayaan, kaa garab istaagi sida aad ula socon lahayd dacwadaada iyo idiin dhexdhexaadinaya adiga iyo hay'adaha dhibaatada kaala dhaxeyso. Waxay arimahaan tan ku saabsan si dhow ula shaqeynayaan looyarkaaga. Ururka gargaarka qaxootiga (VWN) go'aan kama gaarayaan codsigaaga magangelyada ah.

Ma haysataa dokumentiyo cadeynaya qofka aad tahay,sida basaboor, warqada aqoonsiga, shahaadada dhalashada ama sharciga baabuurta lagu wado? Ama waxaad haysataa dokumentiyo cadeynaya safarkaaga ama sheekadaada wax ku kordhinaya, sida tikidka dayaarada, boardingpass, shahaadooyin, xukun ama maqaal jariidad? Soo gudbi dokumentiyadaasi inta lagu jiro diiwaan gelinta ama dalbo dokumentiyadaan inta aanay dacwadaada qaxootinimada bilaabmin. Qof ka tirsan VluchtelingenWerk ee xaruunta dejjin soo dhoweynta ee oodan ayaa arintaan kaa caawinaya.

Dokumentigaaga in ay dhab yihiin waxaa soo baaraya khubarada Koninklijke Marechaussee. IND waxaa ay dokumentigaan u isticmaalaysaa qiimeynta codsigaaga magangelyada ah.

Ka digtoonow! Macluumaadkaaga shaqsiga ah iyo dokumentiyadaada waa u muhiim qiimeynta codsigaaga magangelyada ah. Noqo qof ay wax u dhan yihiin iskana hubi in macluumaadkaaga ay dhan yihiin si sax ahna loo qorey. Weligaa ha tuurin dokumentiyadaada shaqsiga kuu ah.

Dowlada Nederland weligood uma gudbinayaan dowlada wadankii aad ka asalkaa ka timid in aad Nederland megengelyo ka codsatey.

Talaabada 2: nasasho iyo waqtiga diyaargarowga

Dacwada qaxootinimada ma bilabanayso islamarkiiba ka dib marka aad Nederland timaado. Waxaa lagu siinayaa waqti lix maalmood aad kaga nasato safarkii aad ku timid iyo in aad isku diyaariso. Wakhtigaasi waxaa loo yaqaan muddada nasashada iyo is diyaargareynta (RVT). Adigoo la tashanaya looyarkaaga waxaad IND ka codsan kartaa waqtigaasi laguu soo gaabiyo.

Joogitaanka

Saacado gudahood ka dib marka aad isdhiibto isna diiwaangeliso, waxaa lagu geenayaa xero aan laga bixin oo ku taal meel u dhow garoonka dayaaradaha Schiphol. Halkaas ayaad joogeysaa inta dacwadaada xuduudka oo dhan ay socoto. Dhismahaasi waxaa sidoo kale ku yaala xafiiska hay'ada socdaalka iyo jinsiyadaha (IND).

Immigratie- en Naturalisatiedienst
Ministerie van Veiligheid en Justitie

Immigratie- en Naturalisatiedienst (IND) Hay'ada socdaalka iyo jinsiyada. Wasaarada cadaalada iyo amniga. Hay'ada socdaalka iyo jinsiyada (IND) waa qeyb ka tirsan wasaarada cadaalada iyo amniga ee Nederland. Shaqaalaha u shaqeya IND waxay kula yeelanayaan wareysiyo ku saabsan qofka aad tahay, jinsiyadaada, safarkaaga iyo sababihii aad wadankaaga uga soo tagtey. Waxaa ay baarayaan sheekadaada gaarka ah iyo xaalada uu ku sugan yahay wadankii aad ka timid. Markaa ka dib ayay go'aaminayaan in adiga (si ku meel gaar ah) Nederland aad u joogi kartid, ama in aad dib ugu noqoto wadankii aad ka timid.

Baaritaanka qaaxada (TBC)

Qaaxada waa cudur weyn oo aduunka oo dhan aad looga helo. Laga yaabee in uu ka jiro wadanka aad adiga ka timid. Dadka qaba qaaxad lakala qaado waxay cudurka qaadsiin karaan dadka kale, tusaale qufaca dartii ama hindhisada.

Qof ka shaqeeya daryeelka caafimaadka ee xaruunta dejjin soo dhoweynta ayaa su'aalo ku saabsan qaaxada ku weydiinayaa. Haddii shaki laga qabo in aad qaaxada qabto, markaa waxaa laguugu sameynayaa baaritaanka qaaxada oo dhan. Si taa loo sameeyo waxaa lagu geynayaa isbitaal. Haddii aad qaaxo qabto, waxaad Nederland ka heleysaa daaweyn. Dacwada qaxootinimada markuu xaalka sidaa yahay waxay bilaabmeysaa daaweynt ka dib.

Wacyi gelin

Qof la shaqeeya ururka qargaarka qaxootiga (VluchtelingenWerk) ayaa ku siinaya macluumaad iyo sharaxaad ku saabsan dacwadaada qaxootinimada iyo talada qolada caafimaadka.

Shaqaalaha VluchtelingenWerk way ku wargelinayaan, ku garab istaagayaan inta ay dacwadaada qaxootinimada ay socoto. Adeega VluchtelingenWerk waa lacag la'aan. Macluumaadkaagana si qarsoodi ah baa loola dhaqmayaa.

FMMU

Xerada qaxootiga dhexdeeda waxaad balan kula leedahay kalkaaliye caafimaad oo ka socda qolada baaritaanka caafimaadka ee **Forensisch Medische Maatschappij Utrecht (FMMU)**. Kalkaaliyahaasi caafimaad waxaa uu ku weydiinayaa in aad rabto in aad la shaqeyso baaritaanka caafimaadka. Baaritaankaasi ujeedadiisu waa in lagu ogaado in aad maskaxda iyo/ama jirka dhib aad ka qabto, dhibkaas oo saameyn kara wareysiga IND ay adiga kula yeelanayso.

Talada caafimaadka

Baaritaanka inta uu socdo ayay kalkaaliyaasha caafimadka su'aalo ku weydiinayaan. Haddii loo baahdo, waxay kalkaalilayaasha caafimaadka kuu gudbinayaan dhakhtar si baaritaan intaa ka badan laguugu sameeyo. Kalkaaliyaasha caafimaadka ama dhakhtarka ayaa waxa ka soo baxa baaritaanka u gudbinaya IND. Sidaa waxaa la yeelayaa oo keli yah haddii ay adiga kula fiicantahay. IND markaa inta lagu jiro dacwada qaxootinimada way ku xisaabtamaysaa macluumaadka ku saabsan xaalada caafimaadkaaga.

Waa muhiim in aad runta ka sheegtid haddii ay jiraan dhibaato xaga maskaxda iyo jirka ah oo aad dhibkaasi u sheegto kalkaaliyaasha caafimadka ama dhakhtarka. Haddii aad leedahay calaamad muuqata, waa muhiim in aad u sheegto kalkaaliyaasha caafimaadka. Warbixinta laga qoro baaritaanka caafimaadka waa mid qarsoodi ah. Baaritaanka caafimaadka khasab ma aha. Baaritaanka caafimaadka looma baahno in aad adiga iskabixiso.

Haddii aadan rabin in la shaqeyso baaritaanka caafimaadka , waxaad sidaa u sheegi kartaa kalkaaliyaasha caafimaadka. Waa suurtagal haddii xaalku sidaa yahay in IND inta dacwadaada qaxootinimada ay socoto aanay tixgelin xaalka caafimaadkaaga.

Caawinada looyarka

Inta dacwada qaxootinimada ay socot waxaa ku caawinaya looyar. Looyarkaasi waa ka madax banaan yahay dowlada Nederland. Wadahadal aad la yeelato looyarka ayuu kuugu diyaarinayaa wareysiyada aad la yeelanayso IND. Wadahadalkaan u diyaargarowga ah ee aad la yeelanayso looyarkaaga waxaa uu ka dhacayaa dhismaha aad joogto.

Raad voor Rechtsbijstand
legal aid

Raad voor Rechtsbijstand (Golaha gargaarka xaquuqda sharciga) Legal aid. Golaha gargaarka xuquuqda sharciga ah waxaa ay hubinayaan in looyar ku caawina aad hesho haddii aadan iska bixin Karin kharashkiisa. Golaha gargaarka xaqa sharciga ayaa bixinaya kharashka looyarkaasi ku caawinaya. Looyarka uma shaqeeyo ururka gargaarka xaqa sharciga ah. Looyarka waa qof madax banaan oo xaga sharciga kaa caawinaya inta ay dacwadaada magangelyada ah socoto.

Caawinada looyarka looma baahna in aad iska bixiso adiga. Macluumaadkaaga si qarsoodi ah ayaa loola dhaqmayaa.

Talaabada 3: Dacwada qaxootinimada sida ay maalin kasta u dhaceyso

Ka dib nasashada iyo waqtiga diyaargarowga ayaa ay bilaabmaysaa dacwada qaxootinimada. Dacwadaasi qaxootinimada ah waxaa lagu qabanayaa dhismaha aad ku sugan tahay. Xitaa wadahadalada aad la yeelanaysid looyarkaaga goobtaasi ayay lagu qabanayaa. Looyarkaaga iyo shaqaalaha IND waxay ku leeyihiin qolal dhismahaasi.

Halkaan hoose ayaad ka akhrisaneysaa sida dacwada qaxootinamada maalin walba ay u dhacayso.

Maalinta 1: wareysiga hore

Waxaad si rasmi ula yeelatey sarkaal ka tirsan IND wadahadal ku saabsan qofka aad tahay, jinsiyadaada iyo safarkaaga. Wadahadalkaasi waxaa lagu magacaabaa wareysiga koowaad. Wareysigaasi inta aad ku jirto laguma weydiinayo su'aalo ku saabsan sababaha aad magangelyada u codsaneysid. Taa waxay dhacaysaa wareysigan kan xiga ee IND qof ka socda uu kula yeesho (arag maalinta 3aad).

Sarkaalka IND waxaa uu ku weydiinayaa tafaasiil badan si wax badan looga ogaado qofka aad tahay, jinsiyadaada iyo safarkaaga, sidoo kale lagu ogaanayo in aad runta shegeysid. Sida ugu fiican ee suurtagalka ah isugu diyaari wareysigaasi. Mar keli yah ayaa fursad u heleysaa in si cad oo dhan aad u sharaxdo qofka aad tahay. Sheeg mar kasta macluumaadkaaga saxda ah ee aan ahayn kuwa ku qoran dokumentiga falsada ah ee safarkaaga. Sidoo kale sheeg marka aad magac kale oo aan kaaga ahayn aad isticmaashey. Dokumentigaaga iyo sheekadaada waa labaarayaa in ay xaqiiq yihiin iyo inkale. Haddii IND xaqiijiso in sheekadaada aanay sax ahayn ama dokumentigaaga aanay rasmi ahayn, waxay taasi saameyn xun ku yeelan kartaa codsigaaga magangelyada ah. Haddii aad dooneyso, waad warsan kartaa ururka gargaarka qaxootiga (VLuchtelingenWerk) in ay goob joog ka ahaadaan wareysigaaga koowaad. Waxaa kaloo VLuchtelingenWerk ay kaa caawini karaan in dibadda lagaaga keeno dokumentiyada muhiimka ah.

Wadahadalada aad la yeelaneyso IND waxaa jooga turjumaan. Qofka IND ka socda ayaa su'aalaha afka Nederlands kuugu weydiinayaa. Turjumaanka ayaa su'aalahaasi af aad fahmeyso kuugu turjumaya. Turjumaanku waa qof madaxbanaan sameyna kuma laha go'aanka laga gaarayo codsigaaga megengelyaada ah. Sheeg haddii adiga iyo turjumaanku si fiican aydaan isufahmeyn. Markaa qofka IND ka socda ayaa kuu keenaya turjumaan kale. Waa muhiin in aanu meesha qalad soo gelin oo ka imaanaya su'aalaha oo aadan si fiican u fahmin.

Haddii adiga iyo xaaskaagu/ ninkaagu ama lamaanahaaga isku mar codsiga magangelyada aad soo gudbiseen, qof kastoo idiin ka mid ah wareysi gaar ayuu la yeelanayaa qof u shaqeeya IND. Waxaad heleysaa (la soo marsiin looyarkaaga) warbixintii laga qorey wareysigii koowaad.

Maalint 2: u diyaargarowga wareysiga labaad

Looyarkaagu wuxuu kuu akhrinayaa wixii wareysiga koowaad lagaa qoray. Looyarku wuxuu leeyahay qol oo xaruunta dejjin soodhoweynta ku dhexyaal. Inta lagu gudo jiro wadahadalkaasi turjumaan ayaa idiin turjumaya waxa aad adiga iyo looyarka isleedihiin. haddii warbixinta wax ka dhiman yihiin ama si sax ah loo qorin wixii aad sheegtay, markaas looyarkaaga ayaa warqad ugu gudbinaya IND sidaasi. Looyarkaaga waxaa uu kuu diyaarinayaa wareysiga labaad ee IND la yeelaneysid.

Maalinta 3: wareysiga labaad

Wadahadalka labaad ee qof shaqaalaha IND ka mid ah aad la yeelato waxaa la dhahaa wareysiga labaad. Wareysigaasi waxaad ku sheegi kartaa sababaha kuugu kalifey in aad megengelyo codsato. Qofka IND ka socda su'aalo ayuu sidoo kale wareysigana kuugu weydiinayaa.

Waa muhiim in aad wax kasta aad sheegtid oo laga fahmi karo in aad badbaadin u baahantahay. Si daacad ah wax u sheeg, si buuxda oo dhan dhibaata aad la soo kulantey iyo sababta aadan badbaadin uga heleyn wadankii aad ka timid u sheeg. Haddi dhacdooyinka qaarkood si dhan aadan u xasuusan karin, u sheeg sidaa qofka IND ka socda. Qofka IND u shaqeeya wuu la socdaa xaalada guud ee wadankaaga ka jirta. Waa muhiim in aad sheegto xaalka adiga kuu gaarka ah iyo sababta aad badbaadin shaqsi ah ugu baahantahay. Sida ugu fiican ee kuu suurtageli kar u sheeg wax kastoo dacwadaada wax ku kordhinaya. Haddii calaamadu muuqda korkaagu ku yaalaan, dhiba xaga jirka ama maskaxda aad qabto oo xiriir la leh sababaha aad magangelyada u codsaneysid, waa muhiin in aad arimahaasi qofka IND ka socda aad u sheegtid. Markaa IND waxay go'aan ku gaari karaan in adiga baaritaan caafimaad ah kuu soo bandhigaan haddii ay IND taasi u aragto in ay muhiim u tahay qiimeynta codsigaaga. Waad awoodaa in baritaan nuucaas ah aad iskaa u sameyso qarashkiisan aad iska bixiso.

Sidoo kale wareysigaan waxaa jooga turjumaan. Haddii aad dooneysid waad warsan kartaa ururka gargaarka qaxootiga in ay goob joog ka ahaadaan wareysigaaga labaad. Waxaad heleysaa (la soo marsiin looyarkaaga) warbixintii laga qorey wareysigii labaad.

Maalinta 4: akhrinta wareysigii labaad

Looyarkaaga ayaad ka wadahadlaysaan warbixinta wareysiga labaad. Sidoo kale wareysigan turjumaan ayaa idiinka caawinaya tujumida wax alle waxii adiga iyo looyarka aad sheegtaan. Haddii warbixintaasi wax ka dhiman yahay ama aan si sax ah u qorneyn, markaa looyarkaaga ayaa sidaasi warqad qoraal ah IND ugu sheegaya.

Maalinta 5: go'aanka lagu tala jiro

IND waxay qiimeyneysaa in aad soo buuxisey sharuudaha sharciga qaxootinimada. Qiimeyntaasi waxii ka soo baxa ayay ku xiran tahay sida ay dacwadaada u sii soconeyso. Waxay noqon kartaa afar xaaladood:

1. Waad soo buuxisey sharuudahii sharciga qaxootinimada. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqada IND (= go'aanka) oo ay ku qoran tahay in ay dhamaatey dacwada xuduudka iyo in laguu ogolaadey gelitaanka Nederland. Codsigaaga magangelyada ah iyadoo lala tashanayo looyarkaga sida ugu dhaqsiyaha badan loo ogolaanayo. Waad (si ku meel gaar ah) ku noolaan kartaa Nederland. Looyarkaaga ayaa kuu sheegaya saameynta ay tani kuu yeelan karto.
2. IND waxay u baahantahay waqti dheer oo baarintaan ah oo 28 maalmood gudahood codsigaaga magangelyada ah go'aan ugama gaari karaan. IND dacwadaada waxay ku daraysaa dacwadaha mudda dheer looga howgalayo. Sii socodka dacwada waxaa uu ka dhacayaa xero la ogol yahay in laga baxo. Go'aanka laga gaarayo codsigaaga mar dambe ayuu noqonayaa. Waxaad heleysaa warbixin kale oo macluumaadka dacwadaha dheer ku saabsan.
3. IND waxay u aragtaa in aadan sida la yaabo soo buuxin sharuudihii sharciga qaxootinimada, laakiin codsigaaga magangelyada ah ay uga howlgalayso sida kuwa dacwadaha qaxootinimada ee guud. Sii socodka dacwada waxaa ay inta badan billaabmeeysaa usbuuc keddib waxa ayna uu ka dhacayaa xero la ogol yahay in laga baxo. Waxaad heleysaa warbixin ku saabsan macluumaadka dacwada qaxootinimada guud.
4. IND waxay u aragtaa in aadan soo buuxin sharuudahii sharciga qaxootinimda. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) inta dacwada xuduudaha ay socoto warqad IND ka timid oo ay ku qoran tahay in ay IND ku tala jirto codsigaaga magangelyada ah diido. Warqadaasi waxaa sidoo kale ku qoran sababaha lagu gaarey diidmada lagu tala jiro iyo saameynta ay kuugu yeelanayso. Looyarkaaga ayaad ka wadahadlaysaan warqadaani.

Maalinta 6: aragtidaada (zienswijze)

Haddii IND ay ku tala jirto in codsigaaga magangelyada ah diido, looyarkaaga ayaad ka wadahadlaysaan ku tala galkaasi. Balan ayuu mar hore looyarkaaga kuu sameeyey oo arinka ku saabsan. Looyarkaaga ayaa markaa ka dib IND si qoraal ah mowqifkiina ugu diraya. Taasi waa warqad oo aad si rasmi ah uga jawaabeysid ku tala galka diidmada ah ee IND isla markaasi aad ku sheegeysid sababta aadan uga raacsaneyn.

Maalinta 7 iyo 8: go'aanka

Ka dib marka la akhriyo aragtidaada ayay IND qiimeyneysaa in go'aankii ay ku tala jirtey ay wax ka bedesho iyo in kale. Qiimeyntaasi waxii ka soo baxa ayay ku xiran tahay mar kale sida ay dacwadaada u sii socon doonto. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqad ay IND kuugu wargelineyso waxii ka soo baxay qiimentaasi. Looyarkaaga ayaa kuu sheegaya saameynta ay tani kuugu yeelanayso. Waxay noqon kartaa afar xaaladood:

1. Waad soo buuxisey sharuudihii sharciga qaxootinimada. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqada IND oo ay ku qoran tahay in la joojinayo dacwada xuduudka iyo in laguu ogolaadey gelitaanka Nederland. Codsigaagii magangelyada ah iyadoo lala tashanayo looyarkaaga ayaa sida ugu dhaqsiyaha badan loo ogolaanayaa. Waad (si ku meel gaar ah) ugu noolaan kartaa Nederland. Looyarkaaga ayaa kuu sheegaya saameynta ay tani kuu yeelan karto.
2. IND waxay u baahantahay waqti dheer oo baarintaan ah oo 28 maalmood gudahood codsigaaga magangelyada ah go'aan ugama gaari karaan. IND dacwadaada waxay ku daraysaa dacwadaha mudda dheer looga howgalo. Sii socodka dacwada waxaa uu ka dhacayaa xero la ogol yahay in laga baxo. Go'aanka laga gaarayo codsigaaga mar dambe ayuu noqonayaa. Waxaad heleysaa warbixin kale oo macluumaadka dacwadaha dheer ku saabsan.
3. IND waxay u aragtaa in aadan sida laga yaabo soo buuxin sharuudihii sharciga qaxootinimada, laakiin codsigaaga magangelyada ah ay uga howlgalayso sida kuwa dacwadaha qaxootinimada ee guud. Sii socodka dacwada waxaa uu ka dhacayaa xero la ogol yahay in laga baxo. Waxaad heleysaa warbixin ku saabsan macluumaadka dacwada qaxootinimada guud.
4. IND waxay u aragtaa in aadan soo buuxin sharuudahii sharciga qaxootinimda. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) inta dacwada xuduudaha ay socoto warqad IND ka timid oo ay ku qoran tahay in ay IND ku tala jirto codsigaaga magangelyada ah diido. Warqadaasi waxaa la socda oo lagu siinayaa warbixin gooni ah oo ku saabsan saameenta ay diidmada leeedahay, iyo maxaad kaga hor tegi kartaa iyo fursadaha dib u noqosho. Go'aankaasi waxaa sidoo kale ku qoran sababaha lagu gaarey diidmada lagu tala jiro iyo saameynta ay kuugu yeelanayso. Looyarkaaga ayaad ka wadahadlaysaan go'aankaasi.

Ka digtoonow! Halkaan kore waxaa lagu soo sharxay in dacwada xuduudka sida caadiga ah ay qaadanayso 8 maalmood. Mararka qaar IND suurtagal uma ah in 8 maalmood go'aan ku gaarto, tusaale in loo baahdo in la sameeyo baaritaan weyn. Sidaa daraadeed ayaa waqtiga 8 maalmood laga dhigayaa ilaa iyo 28 maalmood. Xaaladaha qaarkood IND waxay dacwada xuduudka ku qadanaysaa muddo dheer si ay go'aan uga gaaraan codsigaaga magangelyada ah. Dacwadaha xuduudaha maalmaha sabtida iyo axada waa maalmo la shaqeynayo.

IND waxay ku dadaalaysaa in dacwada xuduudka sida ugu gaaban ee suurtagalka ah u sameyso, si aadan waqti aan loo baahneyn ugu jirto xero aan laga bixi karin. Marka ugu horeysa ay caddaato in dacwadaada magangelyada ah aan looga howlgeli karin dacwada xuduudaha, waa la joojinayaa dacwadaasi. Codsigaadana markaa keddib sidaa daraadeed looga howlgalayaa sida dacwada qaxootinimada guud ama dacwada waqtiga dheer qaadata. Waxaad markaa joogeysaa xero qaxooti.

Goorma ayaad heleysaa sharciga qaxootinimada?

Sharciga dadka ajaanibta ah ee Nederland waxaa ku qoran shuruudaha aad ku heli kartid sharciga qaxootinimada. Waxaad sharci degenaansho ku heli kartaa haddii mid ka mid ah sifooyinka soo socda lagaa helo.

- Waxaad leedahay asbaab la rumeysan karo in wadankaagii aad ka timid laguugu daba geli karo keli yah qabiilkaaga, diinta aad aaminsantahay, jinsiyadaada, arimo siyaasadeed awgeed ama aad ka mid tahay koox gaar ah oo mujtamaca ka mid ah.
- Waxaad leedahay asbaab la rumeysan karo in wadankii aad ka timid uga baqaneysid ciqaab dil ah ama toogasho ah, jirdil ama nooc fal kale ah oo biniáadanimada ka baxsan ama sharaf dil ah oo ka jira wadankii aad ka timid.
- Waxaad leedahay asbaab la rumeysan karo oo aad u baqaneysid in dhibane aad ku noqoto wadankaagi waxyeelo kaasoo gaara dagaalada aan sababta lahayn ee ka socda xabadu iska kaa dhici karto.
- Xaaskaaga/ ninkaaga ama lamaanaha, hooyada, aabaha ama caruur da'yar ah (AMV) oo dhawaan sharci qaxootinimo ah ka helay Nederland. Hayadda socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) waxay go'aan ka gaarayaan in adiga shuruudaha lagugu siinayo sharciga qoxootinimada oo la soo minguuriyay aad buuxisey.

Ururadee kale ayaad la kulmi kartaa?

Dienst Terugkeer en Vertrek
Ministerie van Veiligheid en Justitie

Dienst Terugkeer en Vertrek (**DT&V**) Hayáda dib u celinta iyo bixitaanka waa qeyb ka tirsan wasaarada cadaalada iyo amniga ee Nederland. Haddii codsigaaga magangelyada ah IND ay diido, ayuu qof shaqaale ka ah DT&V kaa caawinayaa sidii aad isugu habeyn lahayd dib ugu noqoshada wadankii aad ka timid.

INTERNATIONAL ORGANIZATION FOR MIGRATION
IOM·OIM
THE UNITED NATIONS MIGRATION AGENCY

IOM Internationale Organisatie voor migratie (**IOM**) (Ururka caalamiga ah ee hijrada) waa urur madax banaan oo caalam oo dhan dadka hijrada ku jira caawinta. IOM waxay kaa caawini karaan marka aad Nederland si iskaa ah u rabto in aad uga tagto. IOM waxay ku siinayaan warbixin wax ku ool ah oo ku saabsan dib u noqoshada iyo dib u degida, waxay kaloo kaa caawineysaa sidii aad Nederland uga bixi lahayd. Qof ka shaqeeyan ururka gargaarka qaxootiga ama looyarkaaga weydiisan kartaa in ay arimahaan kaa caawinaan.

Dienst Justitiële Inrichtingen
Ministerie van Veiligheid en Justitie

Dienst Justitiële Inrichtingen (**DJI**) Hay'ada maxaabiista daryeesha. Wasaarada cadaalada iyo amniga. Hay'ada maxaabiista daryeesha (DJI) waa qeyb ka mid wasaarada cadaalada iyo amniga ee Nederland. Inta ay socoto dacwada xuduuda waxaad joogeysaa goobaha xiran ee xuduudha. Goobahaas oo ay maamulaan DJI.

Maxaa adiga lagaa sugayaa?

Waa muhiim in waqtiga lagu guda jiro howsha dacwadaada in aad sheegto war wax ku kordhinaya codsigaaga magangelyada ah. Waxaa kaloo lagaa sugayaa in dhamaan waxii cadeymo ah oo aad heli kartid (sida dokumenti ama tusaale ahaan warqado xoojinaya warka aad sheegto) aad tustid IND.

Haddii ay jiraan arimo kuu gaar ah oo ay tahay in IND ay ku xisaabtanto? Waad gudbin kartaa arimahaasi. IND markaa way ku tala galayaan arimahaaga, oo mathalan inta wareysiga lagu guda jiro iyo hoyga ay ku siineyso COA. Waxay IND ku dadaalaysa sida ugu fiican oo ay kuu garab istaagi lahaayeen.

Codsigaaga oo aad dib ula noqdo

Waad awoodaa in aad marka aad rabto la noqoto codsigaaga. Haddii xaalku sidaa yahay waxaa markaa laguula talinayaa in aad looyarkaga la xiriirto ama aad toos ula xiriirto IND. Haddii aad la noqoto codsigaaga, taasi waxay keeneysaa in aadan sii joogi Karin Nederland, marka laga reebo in sabab kale laguugu ogolaanayo in aad sii joogto. Kaddib marka aad la noqoto codsigaada magangelyo waxaa weli kuu macquul ah in codsi magangelyo cusub aad sameeyso.

Dacwada qaxootinimada ka dib

Haddii IND ay codsigaaga magangelyada ah ku diido gudaha dacwada xuduuda, waxaad yeeli kartaa adigoo la tashanaya looyarkaga in aad go'aankaasi kaga dacwooto garsoore Nederland ah. Taa macnaheedu waa in aad si rasmi ah ugu gudbineysid garsooraha in aadan ku raacsanayn go'aanka ay IND gaareen. Waxaad kaloo garsooraha weydiin kartaa in adiga inta ay dacwada socoto Nederland aad joogi kartid. Looyarkaaga ayaa arimahan kaa caawinaya.

Garsooraha waxaa uu markaa ka dib baarayaa in IND sharciga Nederland si sax ah u dhaqangelisey go'aankii ay ka gaartey codsigaaga magangelyada ah. Xaalado badan waad ku sugi kartaa go'aanka garsooraha gudaha Nederland.

Haddii IND ay diido codsigaaga magangelyada ah, waxaa lagu geynayaa qeyb kale oo ka mid ah dhismahasi aan laga bixi karin. Halkaasi ayaad ku sugaysaa ka bixitaankaaga Nederland. Inta badan waxaa kaloo lagu dul saarayaa ka mamnuucis u soo safris oo quseeysa in badan oo waddamada Yurub. Taasi awgeed ma laguu oggola in aad u soo safarto waddamdaasi mana aad joogi kartid. Kaddib marka lagu diido waa kuu macquul ah in aad codsi magangelyo cusub aad sameeyso, xitaa iyada oo ka mamnuucis u soo safris lagu dul saaray.

Adiga ayaa si shaqsi ah uga masuul ah dib ugu noqoshada wadankii aad asalkaa ka timid. Hay'adda dib u celinta iyo bixitaanka (DT&V) ayaa kaa caawineysa isudiyaarinta bixitaankaaga arrinkaasina adiga kaala hadleysa. Haddii IND codsigaaga magangelyada diido, waxaad heleysaa warbixin gaar ah oo ku saabsan dib ugu noqoshada wadankii aad asalkaa ka timid.

Haddii aad rabto in aad si iskaa ah dib ugu noqotid wadankii aad asalkaa ka timid, markaa waxaad la xiriiri kartaa hay'adda caaliamiga ah ee hijrada (IOM). Waxay (IOM) ku siin kartaa macluumaad wax ku ool ah kaana caawinaya bixitaankaaga. Xitaa ka dib dacwada qaxootinimda ururka gargaarka qaxootiga (VWN) waad kala xiriiri kartaa macluumaad iyo caawinaadba.

Ka hawl galka macluumaadka shaqsiga

Macluumaadka shaqsiga waa warbixinno kala duwan oo adiga kuugu saabsan. Hey'adaha oo buuggan warbixinta ka wada shaqeeyay waxa ay ku xusan yihiin xagga hoose. Hey'adahaan waxa ay ka hawl galaan macluumaadka shaqsiga inta uu socoto codsigaada magangelyo, weydiisigaada ama is xaadirintaada. Iyaga ayaa ku weydiinaayo macluumaadkaada iyo hey'ado kale iyo dad kale haddii loo baahdo. Hey'adahaan waa ay isticmaalaan waana ay keydiyaan macluumaadkaada waxa ayna u gudbiyaan hey'ado kale haddii ay taasi sharciga waafaqsan tahay. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa ku yaal waajibaadka hey'adaha ka hawl galo macluumaadkaada. Waa in ay tusaale ahaan, si taxadder leh oo amaankeeda sugan yahay u adeegsadaan macluumaadkaada. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa kaloo ku yaal xuquuqdaada, tusaale ahaan:

- in aad aragto ogaatana macluumaadkaada hey'adaha la yaal;
- in aad ogaato waxa ay hey'adaha ku sameyaan macluumaadkaada iyo sababta;
- in aad ogaato hey'adahee loo gudbiyay macluumaadkaada.

Ma dooneysaa in aad dheeraad ka ogaato ka hawl galka macluumaadkaada shaqsiga iyo xuquuqdaada? Markaa eeg websiteyada hey'adaha. Xagga hoose ee buuggan warbixinta ka

akhriso ciwaannada websiteyada.

Su'aalo inta badan laysweydiiyo

Goorma ayaan wareysiga ugu horeya IND la leeyahay?
Ka dib marka aad is dhiibto waxaad leedahay ugu yaraan lix maalmood in aad isku diyaariso dacwada qaxootinimada. Laakiin waxay noqotaa waqti intaa ka dheer inta aad wareysiga hore IND ay kula yeelanayso. Xerada qaxootiga ee (COA) ayay IND warqad kuugu soo direysaa oo ay kuugu balaminayaan wareysiga hore.

Intee Ayaan sugayaa go'aanka IND?
Dacwada qaxootinimada ee guud waxay socotaa sida badan sideed maalmood. Mararka qaarkood IND sideed maalmood gudahood go'aan kuma gaari garto, sababta oo ah tusaale adiga oo inta dacwada ay socoto xanuunsada. Marka uu xaalku sidaa yahay IND lix maalmood ayay ku darsan karaan si ay codsigaaga magangelyada ah go'aan uga gaaraan. Xafiisyada IND sida caadiga ah malmaaha sabtida iyo axada wey xiran yihiin oo ma ah maalmo la shaqeeyo. Sidoo kale IND waxay go'aansan karaan in codsigaaga magangelyada ay ugu howlgalaan sida dacwadaha mudada dheer qaata. Marka uu xaalku sidaa yahay waxay ku qaadanaysaa ugu badnaan lix bilood laga bilaabo maalinta aad saxiixdo codsiga magangelyada in IND go'aan uga gaarto codsigaaga magangelyada ah. Waxaad markaa heleysaa warbixin kale oo macluumaad ku saabsan dacwada dheeraata aad ka heleyso.

Haddii IND aanay lix bilood gudaheed go'aan ku gaari Karin, way kuugu wargelineysaa IND sidaasi. Haddii aanay IND lix bilood ka dib codsigaaga magangelyada weli go'aan kuu soo dirin isla markaasi aadan wax wargelin ah ka helin? Markaa warqad waad ku warsan kartaa IND in laba todobaad gudahood go'aan ay uga gaaraan codsigaaga magangelyada ah. Looyarkaaga ayaa kaa caawini kara arintan. Dalab uu looyarkaaga gudbiyo darteed ayuu garsooraha markaa ka dib go'aan ka gaari karaa in IND ganaax ay ka bixiso maalin kasta oo aanay go'aan ka gaarin codsigaaga.

Waxaan door bidayaa in aan sheekadeydu u sheegto qof dumar ah. Sidaa ma la ogol yahay?
Wadankan Nederland xiriirka raga ama dumarka ee nolol maalmeedka ku saabsan ma diidi kartid. Mujtamaca Nederland raga iyo dumarka si siman ayaa loola dhaqmaa. Sidaa ayaan adigana kaa filaneynaa. Laakiin haddii aad jeceshahay in aad qof dumar ah oo IND ka socda aad kala hadasho sababta aad magangelyada u codsaneysid, markaa waxaad sidaa ka sheegi kartaa wareysiga hore ee aad IND la yeelato. Markaa IND waxay isku dayaysaa in wareysiga labaad qof dumar ah oo turjumaan kuu noqota ay joogto. Ma qof rag ah ayaad rabtaa in aad sheekadaad u sheegato? Sidoo kale wareysiga koowaad ayaa sidaa ku sheegi kartaa. Markaa IND waxay isku dayaysaa in wareysiga labaad qof rag ah oo turjumaan kuu noqda uu joogo.

Maxaan sameeyaa haddii aan xanuunsanayo ama aan uur leeyahay?
Haddii aad xanuunsantahay ama aad uur leedahay, u sheeg Adeegga Caafimaadka ee garoonka diyaaradaha, iyo sidaa kalkaalayaasha caafimaadka marka ay baaritaanka tala bixinta caafimaadka kulayeeshaan (eeg xagga kore). Dheeraad ku saabsan talabixinta caafimaad ka akhriso warbixnta: Inta aadan dacwada qaxootinamada bilaabin. Arintan aad ayay muhiim u tahay haddii aad cudurada laka qaado aad qabto ama aad u malayneysid, sida tiibishada, isnidaamiska ama cudurada beerka. Wax kastoo aad kalkaaliyaasha caafimaadka u sheegto si qarsoodi ah ayaa loola dhaqmayaa. Kalkaaliyaasha caafimaadka macluumaadka caafimaadkaaga uma gudbinayaan weligood dad kale adigoon ogolaan. Haddi inta dacwada magangelyada ah ay socoto aad xanuunsato, u sheeg sidaa qof ka mid ah shaqaalaha, IND ama ururka gargaarka qaxootiga (VWN). Waxay ayagu kaa caawini karaan daryeel caafimaad sidii aad ku heli lahayd. Haddii aad xanuunsato maalinta balanta aad la leedahay IND ama looyarkaaga, weydiiso ilaalada ama markaa qof shaqaalaha Ururka gargaarka Qaxootiga ka tirsan in uu xanuunkaaga u gudbiyo looyarkaaga ama IND.

Ma qabtaa weli su'aalo ka dib marka aad warbixintaan akhrisato?
Su'aalahaasi waxaad weydiin kartaa looyarkaaga ama qof ka tirsan shaqaalaha COA, IND ama ururka gargaarka qaxootiga (VWN).

Cabasho ma leedahay?
Dhamaan hay'adaha ku shaqada leh dacwada qaxootinimada, waxey u shaqeeyaan in si xirfad iyo taxadir leh. Haddii aad u aragto in hay'ad aanay si fiican kuula dhaqmin, markaa cabasho waad ka gudbin kartaa. Looyarkaaga ama qof ka tirsan (VWN) ayaa arintan kaa caawini kara.

Daabacadan waxaa si wada jir ah u soo saaray:
Xaruunta dhexe ee qaxootiga (COA) I www.coa.nl
Hayáda dib u celinta iyo bixitanka (DT&V) I www.dienstterugkeerenvertrek.nl
Hay'ada socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) I www.Ind.nl
Golaha gargaarka xaquuqda sharciga (RvR) I www.rvr.nl
Ururka gargaarka qaxootiga Nederland I www.vluchtelingenwerk.nl

Oo ka wakil ah:
Wasaarada cadaalada iyo amniga, qeybta siyaasada hijrada www.rijksoverheid.nl

Daabacadan waxa ku qoran xuquuq kuma sheegan kartid. Haddii turjumida ay keento fasiraad kala duwan waxaa la raacayaa kan afka Nederlaanka ah.